

Taageeridda Xoojinta Qorshaynta Isbeddelka Cimilada Ee Mashruuca Soomooliya

AQOONTA WADDANIGA AH EE LAQABSIGA ISBEDDELKA CIMILADA IYO ABAARAHA

Digniinta Hore ee Soojireenka ah iyo Tan Casriga ah iyo Tallaabada ay Qaadaan Bulshooyinka Soomaaliyeed



Hordhac

Isbeddelka cimiladu waxa uu dhibaato dhinacyo badan leh ku hayaa dhammaan bulshooyinka adduunka. Soomaaliya waxa si weyn looga dareemayaa saamaynta isbeddelka cimilada. Sida qotada dheer ee bulshooyinku ugu xiran yihiin degaankooda ayaa noqota hanti muhiim oo lagu maareeyo dhibaatooyinka. Qarniyo badan waxa bulshooyinka Soomaalidu ay si qotadheer u fahmsanaayeen dhaqdhaqaaqada adag ee la soo gudboonaaday hab-nololeedkooda degaan. Aqoonta gudaha ah oo lagu maarayn karo nolol-maalmeedkooda ayaa noqotay xigmad keyd ah oo udub-dhexaad u ah xallinta caqabadaha wajiyada badan ee ka dhalanaya isbeddelka cimilada.

Dadka asaliga ah ayaa iyaga oo adeegsanaya kudhaqanka khibraddooda, dejiyey istaraatejijado iyo xeelado ku saabsan sidii loola qabsan lahaa isbeddelka cimilada, taas oo aan ku koobnay oo keliya ilaalinta iyo joogtaynta hab-nololeedka, laakiin, sida oo kale, xaqiijinaysa dheellitirka xiriirka jilicsan ee u dhexeeya ficillada dadka iyo degaanka.

Waxa aan si qotadheer u falanqaynaynaa hodonnimada aqoonta iyo xeeladaha qaran ee Soomaalida, innaga oo iftiiminayna wajiyo kaladuwan oo muhiim u ah laqabsiga isbeddelka cimilada. Laga soo bilaabo hab-dhaqanka reer guuraaga, sida: xoola dhaqatadu u maareeyaan xoolahooda, maarayntaas oo bulshooyinka reer guuraaga ah u ogglaanaysa in ay si aan kala go' lahayn uga gudbaan muuqaallada isbeddelaya ilaa farsamooyinka cusub ee ay biyaha uga faa'iideystaan, taas oo loogu talagalay in lagula dagaallamo biya la'aanta. Waa mid dhinac kasta ka turjumaysa adkaysi iyo hal-abuurnimo ku qotonta aqoonta qotada dheer ee dadka degaanka. Intaas waxa dheer, waxa aan baaraynaa cabbirrada dhaqan-bulsho, annaga oo xoogga saarayna nidaamyada maaraynta khayraadka ee ku saalaysan dhaqanka bulshada iyo xoojinta wadajirkooda.

Iyada oo laga faa'iideysanayo iskaashiga ka dhexeeya hababka aqoonta sayniska iyo aqoonta waddaniga ah, waxa siyaasiyiintu ay abuuri karaan faham buuxa oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa cimilada iyo waxyaabaha ku habboon in laga qabto dhibaatooyinka Soomaaliya soo foodsaaray. Habkan loo wada dhan yahay waxa uu aqoonsanayaa isku-xirnaanta arrimaha degaanka, dhaqanka, iyo arrimaha bulshada, isaga oo ugu dambayniina, gacan ka geysanaya xal waara oo lagula qabsan karo cimilada isbeddelaysa.

Kuwa ugu xun dhacdooyinka cimilada balse aan inta badan la fahmin ayaa jira; sababta oo ah, waa kuwo si tartiib ah u bilowda, saamayntooda muddo ka dib isa soo tarto. Inkas-

ta oo sida loo qeexaa ay kaladuwan tahay, ayna ku xiran tahay xaaladaha, abaarahu guud ahaan, waxa ay qaadataa muddo dheer oo bilo ah ama sannado ah, kaas oo cel-celis ahaan roobabku ay ku yaryihiin marka sannadaha loo eego, ayna ka dhashaan biyo la'aan daran. Sida ay sheegtay hay'adda saadaasha hawada adduunka, abaaraha waxa loo kala saaraa: **(roob la'aan muddo waqti ah meel ku dhacda)**, dhulka oo engegga oo rayskii beeruhu ku bixilahaayeen oo la waayo, halkaas waxa ka dhasha in wax-soosaarkii beeraha uu hoos u dhaco. Waayo, waxan jirin biyihii). (Fashilka nidaamyada khayraadka biyaha si loo daboolo baahida, dhaqan-dhaqaale oo si toos ah iyo si dadbanba u saamaysa dhaqdhaqaaqa aad-anaha.

Dhanka kale, waxa qeexitaanka lagu salayn karaa awoodda roobka – roob wanaagsan, roob muddo cayiman meelo u qabsamay; si loo daboolo baahiyaha nololeed ee khaaska ah.

Aqoonta Soojireenka (Waddaniga) Soomaaliyeed ee Muhiimka u ah Laqabsiga Isbeddelka Cimilada

Saadaasha hawada iyo cimilada ee ku salaysan dhaqanka soojireenka ah ayaa bulshooyin badan oo adduunka oo dhan ka jiraa hage ahaan u adeegsadaan; si ay u gaadhaan go'aannada u suurtagelinaya in ay la qabsadaan isbeddellada cimilada ee ay ka mid yihiin kaladu-wanaanshaha ba'an ee hawada ka dhacaya. Bulshooyin badan oo xoola dhaqata ah oo ka jira Afirika ayaa saadaasha hawada ee dhaqanka ku dhisan ay weli yihiin ilaha ugu muhiimsan ee ay aqoonta u leeyihiin, ayna kala socdaan xogaha iyo xaaladaha jawiga iyo cimilada. Afarta xilli ee sannadka, sida caadiga ah Soomaalidu waxa ay fishaan roobab xilliga guga iyo dayrta. Laakiin Soomaalida taqaan aqoonta waddaniga ah waxa ay sameeyaan saadaasha hawada iyo cimilada xilli kasta; si ay u go'aansadaan qaabka xilliga soo socdaa uu noqon doono.

Dadka waddaniga ahi waxa ay leeyihiin hababka digniinta hore oo soojireen ah; si ay u yaareeyaan saamaynta xun ee lama filaanka ah oo inta badan ka dhalata hawada iyo isbeddelka cimilada aan la saadaalin karin.

Xoola dhaqatadu waxa ay leeyihiin nidaam (digniinta hore), oo ah dhaqan caddoon oo ku salaysan indho-indhayn iyo waaya-aragnimo qarniyo badan soo jirtey. Soomaalidu hawada iyo cimilada waxa ay ka saadilisaa waxyaabo badan oo ay kamid yihiin: meerayayaasha, xiddigaha, dayaxa, cirka, dhabaysha, daruuraha, xoolaha, dhirta, duurjoogta, shimbiraha, cayayaanka, i.w.m.

Saadaasha Ku Salaysan Aqoonta Soojireenka ah ee Laga Eego Meerayasha & Xiddigaha

Mariikh, Suheyb & Saxal

Xoolo dhaqatada aqoonta waddaniga leh ayaa sheegay in ay jiraan labo meere oo yaryar oo la kala yiraahdo Mariikh iyo Saxal. Meerayaashani waxa ay la fariistaan dayaxa sannadkiiba hal mar, ama lixdii biloodba hal mar. Haddii mid kamid ah meerayaashaas uu dayaxa dhanka bidix ka fariisto, iyada oo uu tiro habeenkaas kisi ah yahay, sida: 1, 3, 5, 7, 9, 11 ..., roob ayaa la fishaa; balse haddii uu dhinaca midig ka fariisto, iyada oo tirsiga qaranku yahay tiro dhaban ah, sida: 2, 4, 6, 8, 10 ..., waxa la fishaa abaar.

Saadaasha Hawada oo Dayaxa Laga Eego

Haddii habeenkii caad jilicsan oo xareed u eg dayaxa isku gadaamo, waxa dadka leh aqoonta soojireenka (waddaniga) ah ay sheegaan in dayaxu ku jiro gal xareed ah; sidaas awgeedna la filankaro roob.

Saadaasha Cirka Laga Eego

Haddii maalintii cirku nadiif yahay oo aanu wax daruura ah lahayn, midabkiisuna aad u madow yahay, waxa ay sheegaan in cirka la culay oo loo diyaariyey in uu daruuro yeesho, waxa la fishaana waa roob. Haddii midabka cirka ay ciiro ku gadaaman tahay, rajada roobku waa hooseysaa oo ma wanaagsana ayay yiraahdaan. Haddii xilligu gu' yahay, midabka cirkuna boodh ama qubaar ku rogan yahay oo aanu daruuro lahayn, waxa la yiraahdaan xilligu ma fiicna. Laakiin haddii ay jiraan daruuro jilicsan oo cirka ku kala firdhisin, waxa laga yaabaa in xilliga gugu fiicnaan doono. Taas beddelkeeda, haddii xilligu dayr yahay oo ay daruuro jilicsan cirka ku kala firdhisin yihiin, waxa ay yiraahdaan xilliga dayrtu ma fiicna. Waxa jirta oraah Soomaaliyeed oo leh: "Dayrtii caadliyo guggii ciiro leh, ceel wiyeeraa looga cararaa." Waxa jirta maahmaah oranaysa: "Dayrtu ha diirnaato ama ha da'ayso."

Saadaasha Hawada Dhaqanka Ku Salaysan ee Xoolaha Laga Eego.

Dadka yaqaan aqoonta soojireenka (waddaniga) ah, sida: xoola dhaqatadu, waxa ay saadaaliyaan cimilio iyo jawi khaas ah oo ku salaysan u fiirsasho ay u fiirsadaan isbeddellada da-beecadaha xayawaanka waqtiyo gaar ah. Waxa kamid ah isbeddelka dhaqanka shimbiraha, taranka iyo hab-dhaqanka geela, lo'da, ariga, duurjoogta, iyo cayayaanka. Tilmaamayaasha cimilada iyo hawada ku salaysan ufirsashada dhaqadhaqaaqa iyo dhaqanka xoolaha waxa kamid ah:

Tilmaame	Dhaqanka Xoolaha
Roobabka wanaagsan	<ul style="list-style-type: none"> • Marka la gaaro dhammaadka xilliga jiilaalka, xilliga roobka dayrtuna soo dhowaado, xooluhu waa ay diidaan in ay biyaha cabbaan, taas macnaheedu waa in ay filayaan xareed soo dhow. • Haddii xooluhu marka la maalayo ay degan yihiin oo faraxsan yihiin, waxa la fishaa roob wanaagsan oo soo socdo iyo barwaaqo. • Cawsha oo kamid ah duurjoogta ayaa iyaduna orgoota.
Abaar/Roob la'aan	<ul style="list-style-type: none"> • Xooluhu waxa ay habeenkii ka boodaan xerada oo waxa ay raadsadaan mir iyo daaq. • Xooluhu waxa diidaan in ay ilmahoodu nuugaan, waana iska cayriyaan. • Xooluhu waxa ay diidaan in la maalo, waana dharsaan oo waxa ay muujiyaan caro iyo dhirif. • Cawshu ma orgooto.

Waxa jirta sheeko caan ah oo sheegta in 'cawlka' oo ah cawsha kan lab uu xiddigaha eego, mana orgeeyo dhaddigga haddii uu arko calaamado abaar muujinaya. Halkaas waxa uu ka ogaadaa doog iyo abaar waxa uu noqon doono xilliga dhalashada ilmihisu ku soo aadayo. Waqtiyo badan ayay reer miyigu isku hawleen in ay la socdaan xaaladda cawsha. Habeenkii saqda dhexe ayay mararka qoorkood ku guurayn jireen meelaha ay cawshu daaqdo; si ay ula socdaan haddii ay is orgeynayaan iyo haddii kale. Waxa ay halkaas kala socon jireen goorta ay wanka xamilka uga furayaan idaha.

Waxa la sheegaa in aan cawshu ilmaheeda abaar ku dhalin. Waxa ay isku beegaan xilliga ay cawshu orgooto iyo xilliga ay wanka ku sii daynayaan idaha, cawsha iyo iduhu waa isku sid oo shan bilood ayay ilmaha uurka ku sidaan.

Waxa jira weedho, heeso, maahmaaho, iyo maansooyinka badan oo arrintan la xiriira. Waxa ka mid ah maansadii Abwaan Cali Dhuux Aadan.

*“Markuu Cawlku Cawlaa orgayn, waa u cibaaroone,
Cishaday ku uuraysatiyo, caadaduu garane,
Cashaday calool gelahayaan, cannugga beertiisu,
Curcurradiyo lawyada intuu, ku cuskaduu saaro,
Cirridiyo cagaar miday ku dhalan, caadka kor u eegye,
Hadba cirirka loo nuuriyuu, ku cibro-qaataaye.”*

Saadaasha Hawada Dhaqanka Ku Saylaynsan ee Isticmaalka Daruuraha & Dabaylaha

- Mid kamid ah ilaha saadaasha hawadu waa daruuraha. Haddii ay daruuruhu jilicsan yihiin oo si degdeg ah u soconayaa, xoola dhaqatadu ma jecela. Haddii ay daruuruhu culus yihiin oo si tartiib ah u soconayaan, waxa ay saadaaliyaan roob wanaagsan.
- Dabaylaha: Kaladuwanaanshaha iyo dabeecadaha dabaylaha waxa ay u adeegsadaan tilmaamaha isbeddelka hawada ama jawiga. Dadka leh aqoonta soojireenka (waddaniga) ah waxa ay fiiriyaan jihadda, awoodda, muddada, iyo xilliyada kaladuwana ee dabayshu dhacayso, waxa ayna u isticmaalaan ilo mucluumaad; si ay u saadaaliyaan hawada iyo cimilada. Haddii ay dabayshu beddesho jahadeeda caadiga ah ee xilliga oo ay ka soo dhacdo dhinacyo kaladuwana oo ay yaqaanaan cel-celis waxa ay fishaan roob. Haddii dabayshu xoog badan tahay oo hal jiho ka soo dhacdo, waxa ay saadaaliyaan in roob yaraani dhici doonto ama aan roobba da’ayn.
- Saadaasha Hawada Dhaqanka ee Dhirta Laga Eego. Oday dhaqameedyadu waxa ay dhirta ka daraasayn jireen hawada iyo cimilada. Qaar kamid ah dhirta Soomaaliya ayaa muujiya isbeddelo ka dhashay xaaladaha hawada, iyada oo geedaha qaar ay ubax bixiyaan, markaas oo ay aqoonyahanka dhaqanku ay ku sheegaan in dhirtu filayso roob; sidaas darteed, ay biyihii iyo qoyaankii rayska ee korkooda ku jirey isticmaalayaan. Dhirtaas waxa kamid ah: quraca, galoolka, bilcilka, iyo qaar kale oo badan.

- Geedku ubaxa uu saarayo waxa ay sabab u noqon kartaa kororka qoyaanka la ogaan karo in geedku heli doono. Laakiin bulshada degaanku waxa ay qabaan in ay calaamad u tahay hawada mustaqbalka. Xaaladdan oo kale, Soomaalidii lahayd aqoonta dhaqanka ee soojireenka (waddaniga) ah waxa ay sheegi jireen, geedku waxa uu dareemayaa in roob soo socdo. Geedku waxa uu ciidda ka nuugaa biyaha iyo nafaqada isaga oo adeegsanaya xididdada. Haddii dhirtu dareento in aan roob soo socon oo abaari soo socoto, dhirtu ubax ma yeelato, geedkuna waxa uu dhaqaalaystaa biyaha xididdada ugu jira.

Aqoonta Reer Guuraaga ee Sugnaantada Cuntada La Xiriirta:

Puntland, waxa ka jira noocyo kamid ah dhirta oo si dabiici ah dhulka uga baxda, kuwaas oo dhaqan ahaan loo isticmaalo cunto ahaan, dawo ahaan, dhar ahaan, gogol ahaan, saliid ahaan, xargo ahaan, iyo qaar weel laga tosho, laakiin aan weli la gaarin in beera waaweyn laga sameeyo. Waxa laga yaabaa in marka aqoon ku filan loo helo in ay mustaqbalka waxtar weyn ku yeeshaan haqab-tirka cuntada, nafaqada, caafimaadka, dhakhli-abuurka, iyo in ay adeegyada degaanka wax weyn ka tari doonaan. Qaar badan oo kamid ah dhirtaan ayaa la isticmaalaa xilliyada cunta yarida iyo macaluushu dhacdo. Qaar kamid ah dhirtaas ayaa xilliyada qaarkood si xoog ah loo isticmaalaa. Noocyada dhirta la cuno waxa kamid ah: Yicibta, gobka, canjeelka, garaska, xamurka, carmada, heeliga, iyo kuwo kale. Xitaa marka aanay jirin cunto yaridu ayaa dhirtan iyo qaar kale oo badan cunto ahaan loo isticmaalaa.

Hay'adaha Dhaqanka

Xoola dhaqashadu waxa ay u baahan tahay noocyo kamid ah hay'adaha sida debecsan uga falcelin kara; si ay dhaqso ugula qabsadaan xaaladaha isbeddelka firfircoon ee dhacaya. Xeerarka heshiisyada waxa lagu maamulaa heshiisyada u dhexeeya beelaha. Heeshiyadaas ayaa qeexaya xeerarka lagu maamulayo dhulka iyo arrimaha kale ee la halmaala, waxana jira ciqaabo la mariyo ciddii xeerarka ku xad-gudubta.

Beelaha ama kooxaha samaystay heshiiska xeerarka waxa ay u baahan yihiin in si joogto ah oo dhab ah dib looga wada xaajoodo, la cusboonaysiiyo, hadba wixii soo kordha lagu daro, laguna qeexo in si ku habboon biyaha iyo daaqa looga faa'iideysto.

Masuuliyadda hay'adahaas waxa leh maamul beeleedyada. Odayaasha beeluhu waxa ay maamulaan arrimaha qabiilka, iyaga oo dadkooda ka wakiil ah, gaar ahaan, marka la eego helitaanka khayraadka dabiiciga ah, sida: biyaha, daaqa, iyo xallinta khilaafaadka dhulka.

Dhibaatooyinka Aqoonta Soojireenka (Waddaniga) ah ee Laqabsiga Isbeddelka Cimilada Soomaaliya

Ugaarsiga, Xaalufinta & Luminta Noolaha Kaladuwan.

Colaadaha muddada dheer socda, tamardarrada awoodda hay'adaha, iyo yaraaanta maal-gelinta lagu maareeyo nidaamka degaanka ayaa kamid ah sabaaha horseeda ugaarsiga,

xaalufka, iyo in noolayaal badani ay dalka Soomaaliya ka lumaan. Ugaarsiga iyo xaalufinta dhulka waxa ka dhasha in ay baaba'aan xawayaan badan oo muhiim ah, iyo qaar badan oo kamid ah dhirta, kuwaas oo muhiim u ahaa dadka degaanka ah, qiime weynna ugu fadhiya, sida: in ay hawada, mustaqbalka, iyo waxa cimilada laga filan karo ku saadaaliyaan.

Waxa kale oo meesha ka baxay dhirtii cunto ahaan loo isticmaali jirey xilliyada abaaraha. Taasi waxa ay hoos u dhigtay awooddii aqoonta soojireenka (waddaniga) ah ee bulshada Soomaaliyeed ee xiriirka la leh laqabsiga isbeddelka cimilada

Kororka Saamaynta Isbeddelka Cimilada ee Sii Xoojiyey Abaaraha & Dhacdooyinka Taban ee Hawada.

Xaaladaha laqabsiga isbeddellada cimilada ee dadka degaanka ah waxa ay si aad ah ugu tiirsan yihiin hawada iyo cimilada caadiga ah ee la arki karo, iyada oo ay sii kordhayso saamaynta isbeddelka cimiladu. Waxa batay soonoqnoqodka iyo nidaam la'aanta dhacdooyinka cimilada ba'an, sida: abaaraha iyo daadadka kediska ah. Tani waxa ay xaddidaysaa awoodda bulshada; si ay sax ugu saadaaliyaan xaaladaha cimilada iyo jawiga ay la kulmaan ee soo foodsaara.

Caqabadaha Hay'adaysan & Wacyigelin-yaraanta Bulshada

Waxa jira khilaaf u dhexeeya hababka digniinta hore ee casriga ah iyo habka laqabsiga cimilada ee aqoonta soojireenka (waddaniga) ah, halka loo baahnaa in labada nidaam ay is dhammaystiran ama is buuxiyaan. Isla mar ahaantaa, muddo kadib, hay'adaha maaraynta masoobiiyinka dadweynaha iyo digniinta ugu horreysa ee bulshada iyo goobaha wax-qabadka hore kuma xirna aqoonta iyo dhaqammada asaliga ah, iyada oo aan wax dadaal ah lagu bixin iskudhafka iyo is-kaabidda labada nidaam; si kor loogu qaado awooddooda laqabsi ee cimilada Soomaaliya.

Waxa intaa dheer, in ay meesha ka maqan tahay siyaasad iyo rabitaan wax qabasho iyo go'aan qaadasho ku saabsan ilaalinta degaanka. Waxa tusaale ah, wasaaradda loo igmaday ilaalinta degaanka waa mid kamid ah hay'adaha dawladda ee dhaqaalaha ugu yar ka hesha miisaaniyadda xukuumadda. Waxa kale oo meesha ka maqan iskaashi heer gobol ahaaneed oo la xiriira arrimaha degaanka. Degaanka oo daacadn loo yahay waa fure kamid ah laqabsiga isbeddelka cimilada dhaqanka ku salaysan.

Diidmada / Luminta Aqoonta Soojireenka Waddaniga ah

Mawqifyada xunxun ee ku wajahan aqoonta soojireenka (waddaniga) ah ee ka dhex jirta madaxda qaranka iyo shisheeyaha oo si cad u diidaya habboonaanta, waxtarka, iyo kalsoonida aqoonta waddaniga ah ee khusaysa horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha. Caa-lamiyeynta wax-soosaarka, isticmaalka, iyo nidaamiyada suuqgeynta aqoonta wadaagga

ah ayaa si buuxda u wiiqay jiritaanka aqoonta waddaniga ah. Intaas waxa dheer, in aan dadweynuhu wax dadaal ah u hayn tixgelinta iyo ilaalinta aqoon dhaqameedka. Waxa si tartiib ah u lumaya aqoontii, ku dhaqankii, iyo kartidii waddaniga ahayd oo ay ku jiraan la qabsiga isbeddelka cimilada.

Fariimaha Siyaasadda Muhimka ah

- In cilmibaaris lagu sameeyo aqoonta waddaniga ah ee Soomaalida ee ku aaddan laqabsiga isbeddelka cimilada iyo in la faafiyo aqoonta, lana gaarsiiyaa bulshada, gaar ahaan, xoola dhaqatada iyo beeralayda. Waa in loo aqoonsadaa in ay tahay aqoon hanti ah ee ay leeyihiin dadka Soomaaliyeed; si loo ilaaliyo xaquuqda ummadda Soomaaliyeed.
- Waa in la sameeyaa dadaallo iyo tallaabooyin si aqoonta waddaniga loogu xiro aqoonta casriga ah iyo xogta cimilada; si loo gaaro kafa'a'iidayso wax-ku-ool ah oo si ku habboon bulshada loo gaarsiiyo digniinta ugu horraysa.
- Xoola dhaqatada iyo beeralayda Soomaaliyeed waxa ay khibrad u leeyihiin laqabsiga isbeddellada cimilada gaar ahaan, dhinacyada digniinta ugu horraysa khataraha iyo ka-jawaabista; sidaas darteed, waa in lagu dadaalaa sidii kor loogu qaadi lahaa halitaanka iyo lasocodka xogta si loo gaaro go'aammo ku habboon laqabsiga cimilada oo ku salaysan caddaymo dhab ah.
- Tallaabooyinka siyaasadeed ee ilaalinta iyo soonoolaynta kaladuwanaanta noolayaasha, duurjoogta, keymaha, iyo dhul daaqsimeedka, sida nidaam degaan oo fiyow. Maadaama aqoonta waddaniga ah iyo dhaqammada waddaniga ahi ay aad ugu tiirsan yihiin nidaam degaan caafimaad qaba oo bed-qabnimadiisu ay shaqaynayso. Nabaad-guurka degaanka waxa ay khalkhal gelisaa waxyaabaha dadka aqoonta u leh aqoonta waddaniga ah ay ku gartaan saadasha hawada. Waxa lumaya noocyada iyo waxyaabaha loo isticmaalo tilmaamaha saadaasha hawada iyo cimilada.



Taageeridda Xoojinta Qorshaynta Isbeddelka Cimilada Ee Mashruuca Soomooliya

AQOONTA WADDANIGA AH EE LAQABSIGA ISBEDDELKA CIMILADA IYO ABAARAHA

Digniinta Hore ee Soojireenka ah iyo Tan Casriga ah iyo Tallaabada ay Qaadaan **Bulshooyinka Soomaaliyeed**